IIB MA GALE

# FAAFINTA RASMIGA AH

# الجريدة رسمية

Sannadka 12aad Muqdisho 1 Disember 1984 L. 12

JAMHUURIYADDA DIMOQRAADIGA SOOMAALIYA

لجمهورية الصومال الديمقراطية

FAAFIN BIL SOO BAXA جريدة شهرية

**QIIMADU:** waa 5 shilin lambar waliba — **RUKUNKA:** Sanadii waa Sh. 100 Soomaaliya gudeheeda - dibaddedana waa Shs. 300. Rubunka la weydiisto waqtiga loo gooyey wuxuu ka bilabmaa 1 Janaayo. Qiimaha qortitaanku F. R. halkii sadar iyo waxii ka yar waa 2 laba Sh. Rukunka iyo qoritaanku waxaa la weydiistaa Laanta Maamulka Faafinta Rasmiga ah Lacagta waxaa lagu bixinayaa Xafiiska Canshuuraha ee Wasaaradda Lacagta.

## K O O B N I I N

### QAYBTA KOOWAAD
### SHARCI

SHARCI L. 42 ee 18 Nof. 1984, wax ka bedelid Sharciga Doorashada Golaha Shacbiga iyo Golayaasha Shacbiga ee Deganka BOG. 952

SHARCI L. 43 ee 18 Nof. 1984, Habeynta Xilka iyo Awooda Qunsuliyada Soomaaliyeed. » 958

### QAYBTA LABAAD
### X E E R

XEER MADAXWEYNAHA J.D.S. L. 50 ee 17 Nof. 1984, Oggolaansho Gunno Dhiirigelin » 969

XEER MADAXWEYNAHA J.D.S. L. 51 ee 9 Nof. 1984, Magacaabid Garsoore » 970

Wakaaladda Madbacadda Qaranka

MADAXWEYNAHA J.D.S. L. 52 ee 15 Nof, 1984, Oggolaansho Jinsiyadda Dr. Dieu donne Bajunaki » 971

XEER Sh/ci L. 10 ee 18 Nof. 1984 dib u habey nta sharciga maamulka Xisaabaadka Dawladda. » 973

TALOOYIN ISGAARSIIN OGEYSIIS IYO WIXII LA MID AH.—

QAYBTA SADDEXAAD

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR, 1.12.84, Lumid Jeeg War. L. 435235 ku qoran Cali Ciise Xasan L. 444 » 974

## QAYBTA KOOWAAD

### SHARCI

Sharci lambar 42 taariikh 18 Nof. 1984 wax ka beddelid sharciga Doorashada Golaha shacbiga iyo Golayaasha shacbiga ee Deegaanka (sharci lambar 43 ee 1da Disember 1979).—

MADAXWEYNAHA J.D.S.

ISAGOO TIXGELINAYA: Oggolaanshaha Guddiga Joogtada ah ee Golaha Shacbiga.

WUXUU SOO SAARAYA: Sharciga Soo Socda.

Qod. 1aad

Qod. 5aad Sharciga lambar 43 ee 1da Disembar 1979 Waxaa loo bedelay sida soo socota.

Qod. 5aad waxaa loo dooran karaa xilka xildhibaannimada ama xubin Gole shacbi ee Deegaan, dorta kasta oo

a) Kow iyo labaatan jirsaday sanadka la qabanayo doorashooyinka.

b) Haysta ugu yaraan, Shahaadada Dugsiga dhexe ama aqoon u dhiganta, oo la hubiyey.

t) Waddaninimadiisu sugan tahay.

j) Ka fayow Iimaha Qabiilka, goboleysiga, dan/ga

x) Ka hor imaan danaha Dadweynaha.

kh) U hoggaansan Siyaasadda Kacaanka, Xeerka iyo Barnaamijka Xisbiga Hanti-wadaagga Kacaanka Soomaaliyeed.

Qodobka 2aad

Faqradda 4aad qod. 8aad sharciga lambar 43 ee 1da Disember 1979, waxaa loo bedelay sida soo socota:—

4. Liiska Golaha Shacbigu wuxuu yeelanayaa musharixiin Keyd ah oo tiradoodu tahay ilaa afartan qof.

Qodobka 3aad

Qodobka 17aad sharciga lambar 43 ee 1da Disember 1979, waxaa lagu daray (s) ah oo u qormaya sida soo socota:—

s) DIIWAN LAGU QORAYO MAGACYADA DO/SHA

Qodobka 4aad

Lifaaqa sharciga lambar 43 ee 1da Disembar 1979, kuna saabsan xubnaha Golayaasha shacbiga Degaanna da, waxaa lagu bedelay midka sharcigan ku lifaaqan.

Qodobka 5aad

Erayada Xoghayaha Guddiga xisbiga Degmada iyo Xoghayaha Guddiga Xisbiga Gobolka ee ku qoran sharciga lambar 43 ee 1da Disember 1979, waxaa lagu bedelay Guddoomiyaha Maamulka Degmada iyo Guddoomiyaha Maamulka Gobolka.—

Qodobka 6aad

Sharcigan wuxuu dhaqan gelayaa marka uu saxiixo Madaxweynaha J.D.S. Waxaana lagu soo saarayaa Faa finta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda.

Muqdisho, 18 Nov. 1984

MADAXWEYNAHA J.D.S.

Maxamed Siyaad Barre

LIFAAQA SHARCIGA TIRADA XUBNAHA GOLAYAASHA SHACBIGA EE DEEGAANNADA

## GOBOLKA JUBBADA HOOSE

| | |
|---|---|
| Golaha Sh. ee Deegaanka Kismaayo | — 21 Xubnood |
| Golaha Sh. ee Deegaanka Jamaame | — 21 Xubnood |
| Golaha Sh. ee Deegaanka Afmadow | — 21 Xubnood |
| Golaha Sh. ee Deegaanka Badhaadhe | — 13 Xubnood |

## GOBOLKA BAY

| | |
|---|---|
| Golaha Sh. ee Deegaanka Baydhabo | — 21 Xubnood |
| Golaha Sh. ee Deegaanka Buur Hakabo | — 13 Xubnood |
| Golaha Sh. ee Deegaanka Diinsoor | — 13 Xubnood |
| Golaha Sh. ee Deegaanka Qansaxdhere | — 13 Xubnood |

## GOBOLKA BAKOOL

| | |
|---|---|
| Golaha Sh. ee Deegaanka Xdur | — 21 Xubnood |
| Golaha Sh. ee Deegaanka Waajid | — 13 Xubnood |
| Golaha Sh. ee Deegaanka Yeed | — 13 Xubnood |
| Golaha Sh. ee Deegaanka Ceel Berde | — 13 Xubnood |
| Golaha Sh. ee Deegaanka Tayeeglow | — 13 Xubnood |

## GOBOLKA GEDO

| | |
|---|---|
| Golaha Sh. ee Deegaanka Garbahaarey | — 21 Xubnood |
| Golaha Sh. ee Deegaanka Luuq | — 13 Xubnood |
| Golaha Sh. ee Deegaanka Baardheere | — 21 Xubnood |
| Golaha Sh. ee Deegaanka Doolow | — 13 Xubnood |
| Golaha Sh. ee Deegaanka Beled Xaawo | — 13 Xubnood |
| Golaha Sh. ee Deegaanka Ceel Waaq | — 13 Xubnood |

## GOBOLKA SH. DHEXE

| | |
|---|---|
| Golaha Sh. ee Deegaanka Jawhar | — 21 Xubnood |
| Golaha Sh. ee Deegaanka Balcad | — 21 Xubnood |
| Golaha Sh. ee Deegaanka Aadan Yabaal | — 13 Xubnod |
| Golaha Sh. ee Deegaanka Cadale | — 13 Xubnood |

## GOBOLKA HIIRAAN

Golaha Sh. ee Deegaanka B/Weyne — 21 Xubnood
Golaha Sh. ee Deegaanka B/Burte — 13 Xubnood
Golaha Sh. ee Deegaanka Jalalaqsi — 13 Xubnood

## GOBOLKA GALGADUUD

Golaha Sh. ee Deegaanka Dh/Mareeb — 21 Xubnood
Golaha Sh. ee Deegaanka Ceel Dheer — 13 Xubnood
Golaha Sh. ee Deegaanka Ceel Buur — 13 Xubnood
Golaha Sh. ee Deegaanka Caabud Waaq — 13 Xubnood
Golaha Sh. ee Deegaanka Cadaado — 13 Xubnood

## GOBOLKA MUDUG

Golaha Sh. ee Deegaanka Gaalkacyo — 21 Xubnood
Golaha Sh. ee Deegaanka Xarardheere — 13 Xubnood
Golaha Sh. ee Deegaanka Hobyo — 13 Xubnood
Golaha Sh. ee Deegaanka Jariiban — 13 Xubnood
Golaha Sh. ee Deegaanka Goldogob — 13 Xubnood

## GOBOLKA NUGAAL

Golaha Sh. ee Deegaanka Garoowe — 21 Xubnood
Golaha Sh. ee Deegaanka Eyl — 13 Xubnood
Golaha Sh. ee Deegaanka Burtinle — 13 Xubnood

## GOBOLKA SOOL

Golaha Sh. ee Deegaanka Laascaanood — 21 Xubnood
Golaha Sh. ee Deegaanka Taleex — 13 Xubnood
Golaha Sh. ee Deegaanka Xuddun — 13 Xubnood
Golaha Sh. ee DeegaankaCaynabo — 13 Xubnood

## GOBOLKA AWDAL

Golaha Sh. ee Deegaanka Beki — 21 Xubnood
Golaha Sh. ee Deegaanka Boorame — 21 Xubnood
Golaha Sh. ee Deegaanka Saylac — 13 Xubnood
Golaha Sh. ee Deegaanka Lughaye — 13 Xubnood

## GOBOLKA BARI

Golaha Sh. ee Deegaanka Boosaaso — 21 Xubnood
Golaha Sh· ee Deegaanka Qardho — 13 Xubnood
Golaha Sh. ee DeegaankaBander Beyla — 13 Xubnood
Golaha Sh· ee Deegaanka Iskushuban — 13 Xubnood
Golaha Sh· ee DeegaankaCaluula — 13 Xubnood
Golaha Sh. ee DeegaankaQandala — 13 Xubnood

## GOBOLKA SANAAG

Golaha Sh· ee Deegaanka Ceerigaabo — 21 Xubnood
Golaha Sh· ee Deegaanka Badhan — 13 Xubnood
Golaha Sh. ee Deegaanka Ceel Afweyn — 13 Xubnood

## GOBOLKA TOGDHEER

Sh· ee Deegaanka Burco — 21 Xubnood
Golaha Sh· ee Deegaanka Buuhoodle — 13 Xubnood
Golaha Sh. ee Deegaanka Oodweyne — 13 Xubnood
Golaha Sh· ee Deegaanka Sheekh — 13 Xubnood

## GOBOLKA WAQOOYI GALBEED

Golaha Sh. ee Deegaanka Hargeysa — 21 Xubnood
Golaha Sh· ee Deegaanka Berbera — 21 Xubnood
Golaha Sh· ee Deegaanka Gebiley — 21 Xubnood

## GOBOLKA JUBBADA DHEXE

Golaha Sh. ee Deegaanka Bu'aale — 21 Xubnood
Golaha Sh· ee Deegaanka Jilib — 21 Xubnood
Golaha Sh· ee Deegaanka Saakow — 13 Xubnood

## GOBOLKA SHABEELAHA HOOSE

Golaha Sh. ee Deegaanka Marko — 21 Xubnood
Golaha Sh. ee Deegaanka Qoryooley — 21 Xubnood
Golaha Sh. ee Deegaanka Afgooye — 21 Xubnood
Golaha Sh. ee Deegaanka Wanla Weyn — 13 Xubnood
Golaha Sh. ee Deegaanka Baraawe — 13 Xubnood
Golaha Sh. ee Deegaanka K/Waarey — 13 Xubnood
Golaha Sh. ee Deegaanka Sablaale — 13 Xubnood

## GOBOLKA BANAADIR

Golaha Shacbiga Magaalada Xamar — 35 Xubnood

Sharci Lambar 43 taariikh 18 Nof. 1984 Habeyn Xilka iyo Awoodda Qunsuliyadda Soomaaliyeed.

MADAXWEYNAHA J.D.S.

ISAGOO TIXGELINAYA: Oggolaanshaha Guddiga Joogtada ah ee Golaha Shacbiga.

WUXUU SOO SAARAYAA: Sharciga Soo Socda.—

## MADAXA 1AAD

## QODOBO GUUD

### XUBINTA 1AAD

### QODOBKA 1AAD

Qunsuliyaddu, iyadoo hoos imaaneysa Safaaradda Jamhuuriyadda Dim. Soomaaliya ee fadhida ama ka Wakiilka ah Dalka Qunsuliyaddu ay ka furan tahay, wa xay Dawladda uga wakiil tahay ilaalinta danaha Muwadiniinta.—

### Qodobka 2aad

Qunsuliyadda Guud waxay leedahay Miisaaniyad u gaar ah oo lagu fuliyo hawlaha.—

### Qodobka 3aad

Xafiiska Qunsuliyadda wuxuu u qeybsamaa sida Soo Socota:—

b) Qunsuliyad Guud.—
t) Qunsuliyad.—

### Qodobka 4aad

Jagooyinka Xafiiska Qunsuliyaddu waxay u kala baxdaa sida soo socota.—

b) Qunsul Guud.
t) Qunsul
j) Ku xigeen Qunsul.
x) Ku qeybsane Qunsuliyad.

## Qodobka 5aad

Xilka Saraakiisha Qunsuliyadda waa sida soo socota

b) Qunsulka Guud, wuxuu mas'uul ka yahay Kormeeridda iyo isku duwidda dhammaan arimaha hawlaha Qunsuliyadda.

t) Qunsulka, wuxuu ku xigaa Qunsulka Guud, wuxuuna fuliyaa dhammaan arrimaha Qunsuliyadda.

j) Ku xigeenka Qunsulka, wuxuu Qunsulka guud iyo Qunsulka ka kaaliyaa xilkooda.

x) Ku qaybsanaha Qunsuliyadda, wuxuu madaxa Qunsuliyadda uga mas'uul yahay dhammaan arrimaha Maaliyadda iyo Maamulka ee Qunsuliyadda.

## Qodobka 6aad

1. Qunsulka Guud iyo Qunsulka waxaa magacaaba Madaxweynaha J.D.S. Kaddib marka uu dhegeysto talada Wasiirka Arrimaha Dibadda.

2. Qunsul ku xigeen iyo ku qeybsanaha waxaa magacaaba Wasiirka Wasaaradda Arrimaha Dibadda, kadib marka uu dhegeysto talada madaxda Wasaaradda.

## Qodobka 7aad

Xilka iyo awoodda Qunsuliyadaha waxay ku xusan yihiin Qodobka 4aad, xubintiisa 2aad sharciga tirsigiisu yahay 36 ee soo baxay 26.4.73, Sharciyada kale ee Dalka lagaga dhaqmo, Axdiyada iyo Caadooyinka Caalamiga ah iyo Sharcigan.

## MADAXA 2AAD

## XILKA IYO WAAJIBAADKA QUNSULIYADDA
## XUBINTA 1AAD
## ARRIMAHA JAALLIYADDA

### Qodobka 8aad

1. Qunsuliyadda Guud iyo Qunsuliyaddu waxay ilaaliyaan mas'uulna ka yihiin danaha guud iyo kuwa gaar ahaaneed ee Jaalliyadda Soomaaliyeed ee deggan Dalka ay ka furan yihiin.

2. Danaha ku xusan faqradda 1aad ee qodobkan, waxay noqon karaan kuwo qof qaanuuneed ama kuwo qof shakhsi ah.—

### Qodobka 9aad

Qunsuliyadda, waxaa waajib ku ah ka warqabka xaaladda muwaadinka Soomaaliyeed ee la xiro, waxayna ka qaadeysaa tallaabooyinka lagama maarmaanka ah iyadoo isla markaana la socodsiinaysa Wasaaradda Arrimaha Dibadda iyo Safaaradda, kana kaalmeyneysa muwaadinka sidii uu isaga daafici lahaa dembiga loo haysto.—

### Qodobka 10aad

Qunsuliyaddu waxay ku dadaaleysaa inay dhexdhexaadiso maslaxdana ka gaarto muwaadiniinta uu khilaaf ka dhex dhasho, si aysan arrintooda u hor tegin Maxkamad.—

### Qodobka 11aad

Qunsuliyaddu waxay habka ugu qiima yar Dalka ugu soo dhoofineysaa muwaadiniinta tabaaleysan oo aan awoodi karin inay iskood u soo dhoofaan dhaqaale xumi awgeed iyo kuwa joogitaankoodu uu wax u dhimaayo sumcadda Qaranka Soomaaliyeed.—

Qodobka 12aad

Qunsuliyaddu waxay xil iska saareysaa, guud ahan taakuleynta Jaalliyadda Soomaaliyeed, gaar ahaan Caruurta, dhanka ku dhiirigelinta barashada Diinta Islaamka, afka hooyo, hidaha, dhaqanka iyo waddanka jaceylka.—

Qodobka 13aad

1. Si Qunsilayaddu u hanato abaabulka iyo ka warqabka Jaalliyadda Soomaaliyeed, waxay xil gaar ah iska saareysaa sidii ay u qaban lahayd Naadi ay isugu yimaadaan Jaalliyadda.—

2. Si Jaalliyaddu ay isu maamusho Qunsuliyaddu waa inay ku dadaashaa sidii ay Jaalliyadda uga dhex abuuri lahayd Guddiyo Hoggaamiya ay iska soo xulaan Qunsuliyaduna oggolaato.—

Qodobka 14aad

Si looga gaashaanto khilaaf dhaca, Qunsuliyaddu waxay Jaalliyadda ku hannuuninaysaa dhawridda iyo dhaqanka Dalka ay ku nool yihiin.—

Qodobka 15aad

1. Si loo ilaaliyo midnimada, is jeceylka, is taakuleynta iyo anshaxa suuban, Qunsuliyaddu waxay ka hortegeysaa cid kasta oo ka dhex abuureysa Jaalliyadda akhlaaq xumo dhaawacaysa sumcadda iyo haybadda Shacbiga Soomaaliyeed.—

2. Qunsuliyaddu waxay xil gaar ah iska saareysaa dabar goynta Qabyaaladda, Gobolaysiga iyo wax allaale wixii kale firdhinaya Jaalliyadda, iyadoo isla markaas ku boorineysa muwaadinka qiimaha Qarannimo.

## Qodobka 16aad

Qunsuliyaddu waxay taageero iyo taakuleyn u fidineysaa muwaadiniinta aan maskax ahaan ama da'yari darteed iskood isu maamuli karayn, isla markaasna waxay ku dadaaleysaa inay ilaaliso danaha iyo xuquuqda ay leeyihiin.—

## XUBINTA 2AAD
## ARRIMAHA MAAMULKA

## Qodobka 17aad

Qunsuliyadda waxaa waajib ku ah inay muwaadiniinta Dalka dibaddiisa ku nool u fuliso hawlaha ay qatan Xafiisyada Arrimaha Madaniga ee ku xusan qodobka 18aad ee Sharcigan.—

## Qodobka 18aad

1. Muwaadiniinta deggan Dalka dibaddiisa, marka ay la soo gudboonaato dhalasho ama geeri, Xafiiska Qunsuliyadda, hubsado sugan kaddib, wuxuu diiwaanka ku habboon ku qorayaa qofka dhashay ama geeriyooday iyadoo isla markaana la caddeynayo tilmaamaha u gaarka ah qofkaas.—

2. Marka muwaadinku uu geeriyoodo. Qunsuliyaddu waxay dariiqa ugu sahlan, geeridaas ku soo gaarsiineysaa xarunta Wasaaradda, si loo ogeysiiyo dhaxaltooyada qofka geeridu ku timid.

3. Qunsuliyaddu, waxay Xoolaha muwaadinka geeriyooday ka qaadeysaa tallaabada ugu habboon ee lagu xannaaneyn karo ilaa iyo inta dhaxaltooyadiisa ay ula wareegayaan si waafaqsan shuruucda Dalka, isla markaana waxay ku dadaaleysaa inay sida ugu habboon u raadiso xuquuqdiisa.—

Qodobka 19aad

Qunsuliyaddu, waxay muwaadiniinta u fulineysaa hawsha Nootaayaha, iyadoo raaceysa shuruudda Dalka ka jira ee saameeya arrintaas.—

Qodobka 20aad

1. Iyadoo dhawreysa sharciga tirsigiisu yahay 75 ee soo baxay 14.11.72 (sharciga tasdiiqinta qoraallada), Qunsuliyaddu waxay muwaadiniinta u sugeysaa saxiix yada saaran qoraallada ka soo baxay hay'adaha Dalka ee la soo mariyey habka sharciga tilmaamayo, si ay Da lka dibaddiisa ugu yeeshaan qiimo sharci.—

2. Waxay kaloo muwaadiniinta u sugeysaa saxiix yada saaran qoraallada ka soo baxay Dawladda marti da loo yahay, kaddib marka la soo mariyo Wasaaradda Arrimaha Dibadda ee Dalkaas, si qoraalladaasi ay Dal ka gudihiisa ugu yeeshaan qiimo sharci.—

Qodobka 21aad

1. Qunsuliyaddu waxay muwaadiniinta siineysaa ama u cusbooneysiineysaa Baasaboorka iyo warqadaha dhoofka, kaddib marka ay si sugan ugu caddaato sabab ta keentay siinta ama cusbooneysiinta baasaboorka iyo warqadaha kale, isla markaana ay hubiso in ay idil yih iin shuruudaha baasaboorka.—

2. Haddii muwaadinka baasaboorka ama warqada ha kale ee dhoofka soo weydiistay uu Qaranka ka galay ama faraha kula jiro falal ka dhan ah midnimada iyo Qarannimada shacbiga Soomaaliyeed, Qunsuliyaddu wa xay arrintiisa u soo gudbineysaa Xarunta Wasaaradda iyadoo soo raacineysa warbixin tifaftiran.—

Qodobka 22aad

Qunsuliyaddu iyadoo tixgelineysa danaha guud ee Qaranka, hubsasho sugan kaddib, waxay dal ku gal (Vi sa) siineysaa shisheeyaha doonaya inay Dalka soo ga/n

Qodobka 23aad

1. Maraakiibta iyo Diyaaradaha sita calanka Soomaaliyeed ama Dalka ka diiwaan gashan, Qunsuliyaddu waxay xil gaar ah iska saareysaa inay gacan buuxda ku siiso xilalkooda, isla markaana ay u fuliso wixii hawl ah oo ay uga baahdaan, si waafaqsan sharciga Badaha iyo kan hawada.—

2. Si waafaqsan sharciga Badaha iyo hawada, Qunsuliyaddu waxay si habsami ah ugu kuur geleysaa una kormeereysaa Shaqaalaha, Rakaabka iyo Xamuulka Maraakiibta iyo Diyaaradaha lagu soo tilmaamay faqrada 1aad ee qodobkan.—

3. Qunsuliyaddu, si waafaqsan sharciga Badaha iyo hawada, waxay baaris kaddib go'aanka ku habboon ka gaareysaa dambiyada iyo khilaafka dhaca muddada safarka, kuna dhex oogma. Madaxda, Saraakiisha iyo Shaqaalaha kale.—

XUBINTA 3AAD
ARRIMAHA GANACSIGA

Qodobka 24aad

Qunsuliyaddu waxay sida ugu habboon ugu dadaaleysaa horumarinta xiriirka Ganacsiga iyo dhaqaale ee ka dhexeeya labada Dawladood, iyadoo gudaneysa xilalka ku tilmaaman qod. 4aad faqradda 2aad Sharciga lambar 36 ee 26ka Abriil 1973.—

Qodobka 25aad

Qunsuliyaddu waxay taakuleyn iyo gacan ku siineysaa ku qeybsanaha Ganacsiga gudashada xilalkiisa.

Qodobka 26aad

Meeshii uusan Joogin ku qeybsane Ganacsi, Qunsuliyaddu, iyadoo si joogta ah ula socodsiineysa Safaaradda, waxay qabaneysaa hawlaha ku qaybsanaha Gan/ga

Xubinta 4aad
ARRIMAHA GARSOORKA

Qodobka 27aad

Guurka iyo Furinka la soo gudboonaada muwaadin iinta ku nool Dalka dibaddiisa, Qunsuliyaddu waxay ka qaadeysaa tallaabooyinka ay farayaan shurucda Dalka

Qodobka 28aad

1. Qunsuliyaddu waxay muwaadiniinta gaarsiiney saa qoraallada ka soo baxa hay'adaha Garsoorka ee Da lka Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya.—

2. Qunsuliyaddu, waxay hay'adaha Garsoorka u soo gudbineysaa wixii qoraallo ah ee la xiriira Caddaa ladda oo ay soo gaarsiiyaan Muwaadiniinta.—

3. Qunsuliyaddu, waxay fulineysaa oo kale dham maan hawlaha ay u xil saaran hay'adaha Garsoorka ee Dalka Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya.—

Qodobka 29aad

1. Qunsuliyaddu, waxay hay'adaha ku shaqada leh u soo gudbineysaa ama soo gaarsiineysaa dambiyada lidka ku ah Qaranka Soomaaliyeed oo ay galaan muwaa diniintu, iyadoo ka sameyneysa gal dacwadeed qoraalla diisu ay u idil yihiin, isla markaana waxay sii wadaysaa baarista iyo ka gungaaridda dembiyadaas.—

2. Haddii Dawladda martida loo yahay uu inaga dhexeeyo heshiiska isu celinta Eedeysanayaasha iyo Dembiilayaasha, Qunsuliyaddu kaddib marka ay soo weydiistaan hay'adaha Garsoorka, waxay Saraakiisha Dawladaas kala xiriiraysaa soo celinta Eedeysanaha ama dembiilaha.—

MADAXA 3AAD
QODOBBO KALA DUWAN
Qodobka 30aad

Dalalka aysan Qunsuliyad uga furneyn J.D.S. Iyado la tixgelinayo tirada Jaalliyadda, waxaa Safaaradda la ga dhex abuurayaa xubin Qunsuliyadeed, isla markaa na waxaa loo magacaabayaa Sarkaal ka tirsan Safaar adda oo guta xilka iyo waajibaadka xubintaas.—

### Qodobka 31aad

1. meeshii aysan uga furneyn JDS Ergo, Safaarad Qunsuliyad, haddii loo baahdo waxaa laga furi karaa Qunsuliyad Sharaf.—

2. Qunsul sharafka, waxaa magacaaba Wasiirka Wasaaradda Arrimaha Dibadda, kaddib marka uu dhe geysto talada madaxda Wasaaradda.

3. Qunsul Sharafku, wuxuu ilaaliyaa danaha iyo xuquuqda ay leeyihiin muwaadiniinta Soomaaliyeed, is la markaana wuxuu warbixin tifaftiran oo joogto ah ka keenayaa duruufaha iyo xaaladaha uu la kulmo.

### Qodobka 32aad

Ka sokow xilka iyo awoodda ku xusan qod. 7aad ee Sharcigan, Qunsuliyaddu waxay si waafaqsan shuruuc da iyo Xeerarka labada Dal u fulineysaa hawl kasta oo gudashadeeda ay ugu muuqato inay lagama maarmaan tahay, isla markaana ay dani ugu jirto Qaranka Soo/ed.

### Qodobka 33aad

Wasiirka Arrimaha Dibadda, ayaa awood u leh inuu soo saaro Xeer Hoosaadka (Rogolamento interno) laga dhaqan gelinayo sharcigan isla markaana lagu jideyna yo shax muujineysa. Shaabadaha, Lacagaha qalaad iyo adeegyada loo qabanayo muwaadiniinta qiimahooda.

### Qodobka 34aad

Sharcigan Wuxuu dhaqan gelayaa marka uu saxii xo Madaxweynaha J.D.S. Waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda.—

Muqdisho, 18 Nov. 1984

MADAXWEYNAHA J.D.S.
Maxamed Siyaad Barre

QAYBTA LABAAD

XEER

XEER MADAXWEYNAHA J.D.S. L. 50 ee 17 Nof. 1984 Oggolaansho Gunno Dhiirigelin.—

MADAXWEYNAHA

MARKUU ARKAY: Qod. 82aad ee Dastuurka J.D.S.

MARKUU ARKAY: Sharciga L. 2 ee 29.12.1961 kuna saabsanaa habka maamulka Dawladda ee Xis/ka.

MARKUU ARKAY: Sharciga L. 5 ee 2.2.1980 kuna saa bsanaa Shaqaalaha Dawladda.

MARKUU ARKAY: Talada Wasiirka Macdinta iyo B.

MARKUU TIXGELIYEY: Go'aanka Golaha Wasiirrada ee 30.8.1984. Wuxuu soo saaray xeerka soo socda

Qodobka 1aad

Waxaa loo oggolaaday Gunno dhiirgelin shaqaalaha Wasaaradda Macdinta ee ka shaqeeya qaybaha wax soo saarka sida qaybta Kaartoogaraafka iyo Qodaalka Ceelasha, iyo Jeofiisikada Iwm.

Qodobka 2aad

Gunnada ku sheegan qod. sare waxa lagu cabbirayaa dakhliga ay qayb waliba soo saarto, iyadoo loo raacayo habka soo socda.

1. Qaansheegatada u dhaxeysa sh.So. 1 ilaa 500.000 Waxay ku yeelanayaan 25%.

2. Qaansheegtada u dhaxeysa Sh.So. 500.001 ilaa 1000.000 (hal malyan) waxay ku yeelanayaan 15%.

Qodobka 3aad

Waaxda maamulka iyo Lacagta ee Wasaaradda Macdinta iyo Biyaha marka ay u gudbinayso khasnadda Dawladda Lacagta ku xusan qodobada sare si toos ah ayey ugu reebayaan makhaasiirta iyo xuquuqda shaqaalaha ku yeeshay qaansheegasho kasta.

Qodobka 4aad

Habka iyo maamulka Shaqaalaha loogu qaybinayo Xuquuqda u bislaatay waxaa Xeer hoosaadka ku soo saaraya Wasiirka Macdinta iyo Biyaha.

Qodobka 5aad

Xeerkan wuxuu dhaqan gelayaa marka uu saxiixo Madaxweynaha J.D.S. in loo gudbiyaa Hantidhowraha Guud si loo Diiwaangeliyo.

Muqdisho, 17 Nov. 1984

G/le Sare Axmed Maxamuud Faarax

Wasiirka Macdinta iyo Biyaha

J/le S/Gaas Maxamed Siyaad Barre

SAXID — QALAD

FAAFINTA RASMIGA AH LAM. 6 ee 1da Juunyo 1984,

Bog. kuna soo baxay Xeer- Sharci Lam. 5 ee 18 Maajo 1984, kuna saabsanaa Mu khaddaraadka, Qod. 2aad Qaybtiisa 3aad oo si lama filaan ah looga tegay, waa in loo akhriyaa sida hoos ku qoran.

3 . . Isla ciqaabtaas wa xa mutaysanaya qof kasta oo cuna ama isticmaalay ama lagu helo waxyaabaha maskaxda dooriya, marka uu u haysto sabab ka bax san sababaha ku tilmaa man qodobka 1aad ee Xeer-Sharcigan.

XEER MADAXWEYNAHA J.D.S. L. 51 ee 9 Nof. 1984

Magacaabid Garsoore.

MADAXWEYNAHA J.D.S.

MARKUU ARKAY: Qod. 82aad ee Dastuurka J.D.S.
MARKUU ARKAY: Sharciga Lam. 3 soona baxay 10ki Jannyo 1970 kuna saabsan dhismaha Maxkamadda Badbaadada Dalka iyo wixii beddelaad ku dhaca.

MARKUU TIXGELIYEY: In ay lagama maarmaan tahay in Garsoore loo magacaabo Maxkamadda Badbaadada Dalka si awooddeeda wax qabad sare loogu qaado, la isuguna dheellitiro culeyska hawlaha ay ka xilsaaran tahay.

MARKUU TIXGELIYEY: Tala soo jeedinta Guddoomiyaha MBD tirsigeedu yahay 777/MD1/84 ee 6.11.84.

WUXUU SOO SAARAYAA: Xeerka Soo Socda:—

Qodobka 1aad

J/le Dr. Cismaan Cilmi Guuleed waxaa loo magacaabay inuu Garsoore ka noqdo Max/da Bad/da Dalka.

Qodobka 2aad

Garsooruhu wuxuu yeelanayaa Gunno dhan Sh.So. 800 Bishiiba, waxaana laga bixinayaa Miisaaniyadda Agaasinka Guud ee Lacagta MJDS.

Qodobka 3aad

Xeerkan wuxuu dhaqan gelayaa marka uu saxiixo Madaxweynaha J.D.S. Waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda.

Muqdisho, 9 Nof. 1984

MADAXWEYNAHA J.D.S.
Maxamed Siyaad Barre

XEER MADAXWEYNAHA J.D.S. L. 52 ee 15 Nof. 1984
Oggolaansho Jinsiyadda Soomaaliyeed Dieudonne Basunoki.

MADAXWEYNAHA J.D.S.

MARKUU ARKAY: Qod. 4aad ee Dastuurka.
MARKUU ARKAY: Qod. 12aad ee Nidaamka Dhismaha Dawladda Lr. 14 ee 3.6.62 iyo Isbedelaadii ka Dambeeysay.—

MARKUU ARKAY: Qodobada 4,13, iyo 14 ee sharciga Lr. 28 ee 22.12.62 ee ku saabsan Jinsiyadda Soomaaliyeed Siisahaan.—
MARKUU ARKAY: Qodobada 3,4,5, ee Xeer Madaxweyne lr. 129 ee 19.2.63

MARKUU ARKAY: Arjiga taariikhdiisu ahayd 20.3.84 ee uu la yimid J/le Dr. Dieudonne Bajunaki si uu u helo Jinsiyadda Soomaaliyeed.

MARKUU HUBIYAY: Waafaqsanaanta Dokumentoo yinka qodobada 4aad iyo 6aad ee sharciga lr. 28 ee 22.12.62.
MARKUU ARKAY: Warqad lr. XWKL/M-141/84 ee 3.4.84 ee ka soo baxday Xafiiska Madaxweyne ku Xigeenka 2aad ee J.D.S.

MARKUU DHEGEYSTAY: Golaha Wasiiradda.—
MARKUU DHEGEYSTAY: Soo Jeedinta Wasiirka Arrimaha Gudaha.—

WUXUU XEERIYEY

Qodobka 1aad

Waxaa si sarci ah loogu oggolaaday in J/le Dr. Dieudonne Bajunaki Kanaburebenrenge la siiyo Jinsiyadda Soomaaliyeed.—

Qodobka 2aad

Jinsiyadda Soomaaliyeed Waxaa ku wehliya oo kale Xaaskiisa iyo Carruurtiisa aan Qaangaarin.—

Muqdisho, 15 Nov. 1984

MADAXWEYNAHA J.D.S.

XEER SHARCI LAM. 10 ee 18 Nov. 1984 Dib u habaynta Sharciga Maamulka Xisaabaadka Dawladda.

MADAXWEYNAHA J.D.S.

ISAGOO ARKAY: Qod. 69aad ee Dastuurka J.D.S.

ISAGOO ARKAY: Xeerka Sharciyada lr. 2 ee 29kii Diisembar 1861 iyo beddelaadii ka dambeysay kuna saabsanaa sharciga Maamulka Xisaabaadka Dawladda iyo Xeer Nidaamiyaha lr. 317 ee 17.12.1962 iyo beddelaadii ka dambeysay.

ISAGOO OQOONSADAY: Inay jirto baahi weyn in hawlaha iyo awoodda ku tilmaaman Xeer sharciyeedka Lr. 2 ee 29.12.61 iyo Xeer Nidaamiyaha Lr. 317 ee 17.12.62 dib loogu soo celiyo Xisaabiyaha Guud ee Da/da

ISAGOO TIXGELIYEY: Talada Wasiirka Wasaaradda Maaliyadda.—

ISAGOO TIXGELIYEY: Go'aanka Golaha Wasiir/da.

WUXUU SOO SAARAYAA: Xeer Sharci Soo Socda:

Qodobka 1aad

Laga bilaabo 15 Diisambar 1984 waxaa dib loogu soo celiyey Xisaabiyaha Guud ee Dawladda iyo awoodaha ku tilmaaman sharciga maamulka Xisaabaadka Dawladda lambar 2 ee 29.12.1961 iyo Xeer Nidaamiyaha lambar 317 ee 17..12.1962.

Qodobka 2aad

Waxaa la buriyey Xeerka lr. 1 ee 27.12.1971 kuna saabsanaa wax ku kordhin iyo wax ka beddelidda Xeer Sharciyeedka lambar 2 ee 29kii Diisember 1961 iyo Xeer Nidaamiye lr. 1 ee 27.12.1971.

Qodobka 3aad

1. Xeer Sharcigani wuxuu dhaqan gelayaa marka uu saxiixo Madaxweynaha J.D.S. Waxaana loo gudbina yaa Golaha Shacbiga Qaranka si Sharci loogu Rogo.

2. Xeer Sharcigan waxaa lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda.

Muqdisho, 18 Nov. 1984

MADAXWEYNAHA J.D.S.
Maxamed Siyaad Barre

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

GUDDOOMIYAHA MAXKAMADDA GOB. BANAADIR

HADDUU ARKAY: DACWADDA KOR KU QORAN:

HADDUU ARKAY: In J. War· Lumay oo lambarkiisu ahaa 435235 lagana soosaaray Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed laanta Hargeysa kuna qo ran lacag dhan Sh.So· 8.000 oo uu iska lahaa J/le Cali Ciise Xasan sida ku cad warqadda lam· 023299 taariikh 1·12·84 ee Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed Qaybta Xis. Guud.

HADDUU ARKAY: Qod. 69 sharciga lam· 2 ee 9.9·1965

WUXUU XEERIYEY

In la baai'iyo (Ammortamento) Jeegga War· Lamb. 435235 oo ku qoran J/le Cali Ciise Xasan ayna ku Jirto Sh·So· 8·000.

WUXUU FARAYAA

In Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed Laanta Hargeysa u bedelo J/Wareega ee kor ku tilmaa man una sameeyo mid la mid ah ka dib markay ka soo wareegto muddo 15 maalmood laga bilaabo maalinta Go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee J.D.S· Haddii inta ka horaysa aan wax is hortag ah laga kenin

GUDDOOMIYAHA MAXKAMADDA GOB· BANAADIR
Dr· Cabdullaahi Maxamed Maax

L. 444